

القيم الإنسانية في سورة الحجرات

Akhlaaqda dadnimada oo ku sugan suuratu Alxujuraad

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

{قُلْ إِنَّمَاٰ هَذَا نِيَّرٌ رَّبِّيُّ إِلَىٰ صِرَاطٍ مُّسْتَقِيمٍ دِينًا قِيمًا مِّلَةً إِبْرَاهِيمَ حَنِيفًا
وَمَا كَانَ مِنَ الْمُشْرِكِينَ}

(dheh wuxuu igu Hanuuniyay Eebahay jid toosan diin Sugan oo diintii (Nabi) Ibraahim isagoo toosan oon gaalada ka mid ahayn), waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago, waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa oo xadiiskiisa sharafta leh ku yiri:

(إِنَّمَا بُعْثِتُ لِأَتَمِّمَ صَالِحَ الْأَخْلَاقِ)

(Waxaa uun laysoo diray inaan dhammaystiro akhlaaqda wanaagsan), Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

Intaas kaddib:

Quraanka kariimka waxaa ka buuxa aayadaha salka u dhigaya akhlaaqda fiican, iyo qiyamka sarreeya, bal

waxaa ku jira suurado oo dhan salka u dhigaya bulsho aadane sarraysa, sida suuratu Alxujuraad oo qiyam iyo akhlaaq sugtay, waxaa ka mid ah: hubsashada arrimaha oo dhan, gaar ahaan marka uu arrinkan la xiriiro dadka xaalkooda, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu wataacaalaa:

{بِإِيْهَا الَّذِينَ آمَنُوا أَنْ جَاءَكُمْ فَاسِقٌ بِنَبَأٍ فَتَبَيَّنُوا أَنْ تُصِيبُوهُ قَوْمًا
بِجَهَالَةٍ فَتُصْبِحُوا عَلَىٰ مَا فُعَلُّمُ نَادِمِينَ}

(Kuwa xaqa rumeeyow hadduu idiiinla yimaaddo faasiq war, hubsada, si aydaan dad u dhibin ogaansho la'aan, markaasna aad ka shallaydaan waxaad fasheen).

Islaamka wax kaste dhab ayuu ku dhisaa, waa kanaa sayidkeena Suleymaan – nabadgeleyo korkiisa ha haatee - markuu hud'hud ula yimid warka kuwii caabudayay qorrxada Alle sokadiisa, hadalkiisa wuxuu ku tilmaamay inuu yahay hadal dhab ah, iskama qaadanin hadalkiisa waa hubsaday siduu quraanka sheegay wuxuu yiri Alle:

{فَالَّذِينَ سَنَنَّا لَهُمْ أَنَّ يُحَدِّثُ إِنَّمَا مَنْ كَانَ مِنَ الْكَاذِبِينَ}

(Wuxuuna yiri Waannu eegi doonaa inaad run sheegayso iyo inaad ka mid tahay Beenaalayaasha), wuxuu leeyahay nabiga:

(كَفَىٰ بِالْمَرْءِ إِنَّمَا أَنْ يُحَدِّثُ بِكُلِّ مَا سَمِعَ)

(Qofka dambi waxaa ku filan inuu sheego wax kaste uu maqlay), wuxuu yiri imaam Nawawi - Alle ha u naxariistee -: wuxuu maqlaa qofka caadi ahaan run iyo

beenba hadduu sheego wax kaste uu maqlo been buu sheegaa sheegidda uu sheegay wax aan dhicin owgeed, markuu ninka usoo galay sayidkeena Cumar bin Cabdilcaziiz - Alle ha u naxariistee - oo uu nin wax uga sheegay wuxuu ku yiri: haddaad doonto arrinkaaga ayaan eegaynaa, haddii aad been sheegayso waxaad ka mid tahay dadka aayaddan soo galaya:

{إِنْ جَاءُكُمْ فَاسِقٌ فَنِبِّئُوهُ}

(Kuwa xaqa rumeyow hadduu idiinla yimaaddo faasiq war, hubsada) haddii aad run sheegaysana waxaad soo galaysaa dadka aayaddan ay ka hadlayso:

{هَمَّازٌ مَشَاعِيْرِ نَمَيِّمِ}

(oo Xanlow ah, isku diraa ah), haddaad rabtana waan ku cafinaynaa, wuxuu yiri: cafis amiirka mu'miniintow uma laabanayo, qof kaste hadduu ku dadaali lahaa hubsashada intuuna wax xukumin ama uuna faafinin wax kastoo soo gaaraya kutirkuteenka meel ma heli lahayn, kuwa dadka ku dhex faafiya kutirkuteenka way ka hari lahaayeen.

Waxaa ka mid ah: in laga fogaado xanta wuxuu leeyahay Alle:

{وَلَا يَغْتَبْ بَعْضُكُمْ بَعْضًا أَيُّحِبُّ أَحَدُكُمْ أَنْ يَأْكُلَ لَحْمَ أَخِيهِ مَيْتًا فَكَرْهُتُمُوهُ
وَاتَّقُوا اللَّهَ إِنَّ اللَّهَ تَوَابُ رَحِيمٌ}

(Qaarkiinna qaar yuusan xamanin, miyuu jecel yahay midkiinna inuu cuno hilibka walaalkiis oo mayd ah, waad neceb tiihin arrintaa, Eebana ka dhawrsada waa

toobad aqbale naxariistee), waxaa laga wariyay Abuu Hureyra -Ilaahay raalli haka noqdee - inuu yiri rasuulka Alle:

(أَتَدْرُونَ مَا الْغِيْبَةُ؟ ، قَالُوا : (اللَّهُ وَرَسُولُهُ أَعْلَمُ) ، قَالَ : (ذَكْرُكَ أَخَاكَ بِمَا يَكْرُهُ) ، قِيلَ : أَفَرَأَيْتَ إِنْ كَانَ فِي أَخِي مَا أَقُولُ؟ قَالَ : (إِنْ كَانَ فِيهِ مَا تَقُولُ فَقَدْ اغْتَبْتُهُ ، وَإِنْ لَمْ يَكُنْ فِيهِ فَقَدْ بَهَتْهُ)

(Ma og tiihin xanta waxa ay tahay?) waxay dhaheen: (Alle iyo rasuulkiisa ayaa og), wuxuu yiri: (**waa inaad ku sheegto walaalkaaga wax uu neceb yahay**), waxaa la yiri: ka waran haduu ku sugaran yahay walaalkayga waxaan sheegayo?, wuxuu yiri: (**hadduu ku sugaran yahay wawaad sheegayso waad xamatay, hadduusan ku sugnayn waad ku been abuuratay**).

Aadanaha xanta uma keenin waxaan ahayn markuu ceebtiisa kaga mashquulay ceebaha dadka, wuxuu leeyahay rasuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee :-

(يُبَصِّرُ أَحَدُكُمُ الْقَدَّاَةَ فِي عَيْنِ أَخِيهِ ، وَيَسْئِي الْجِدْعَ فِي عَيْنِهِ)

(Midkiina tif ayuu ka dhex arkaa isha walaalkiisa wuxuu illaawaa qori weyn oo ku jira ishiisa), bal qofka waxaa laga rabaa inuu difaaco sharafta walaalkiisa wuxuu leeyahay nabigeena - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee :-

(مَنْ رَدَّ عَنْ عِرْضٍ أَخِيهِ، رَدَّ اللَّهُ عَنْ وَجْهِهِ الْيَوْمَ الْقِيَامَةِ)
(Qofka waalaalkiisa sharftiisa difaaco Ilaahay wejigiisa naarta ayuu ka reebaya maalinta qiyaame)

Waxaa ka mid ah: in laga fogaado duridda, wuxuu leeyahay Alle:

{وَلَا تَلْمِزُوا أَنفُسَكُمْ}

(Hana ceebeynina naftiinna), oo laga wado: ha ceebeynina qaarkiina qaarka kale, Imziga wuxuu noqonayaa hadal, hamzigana waa fal, quraanka kariimka labadaba wuu reebay, wuxuu leeyahay Alle:

{وَيَنْ لِكُلَّ هُمَّةٍ لَمَّةٌ}

(Halaag wuxuu u sugnaaday xanle wax ceebeya oo dhan), waa kuwa dadka dura oo ceebeeya, oo ugu yeera waxa ay nacayaan magac ama sifo, waa digniin laysaga digayo dadka in la duro ama la ceebeeyo, waa gooddi loogu gooddinayo halaag daran qofka arrinkan samaynaya, waxaa laga wariyay Abuu mascuud -Ilaahay raalli haka noqdee - wuxuu yiri:

(لَمَّا أُمِرْتَ بِالصَّدَقَةِ ، كُنَّا نَتَحَمَّلُ ، فَجَاءَ أَبُو عَقِيلَ يَنْصُفِ صَاعٍ ،
وَجَاءَ إِنْسَانٌ يَأْكُلُ مِنْهُ ، فَقَالَ الْمُنَافِقُونَ : إِنَّ اللَّهَ لَعَنِيْ عَنْ صَدَقَةٍ هَذَا
، وَمَا فَعَلَ هَذَا الْآخَرُ إِلَّا رِيَاءً، فَنَزَّلْتُ : {الَّذِينَ يَلْمِزُونَ الْمُطَوَّعِينَ مِنَ
الْمُؤْمِنِينَ فِي الصَّدَقَاتِ وَالَّذِينَ لَا يَجِدُونَ إِلَّا جُهْدَهُمْ فَيَسْخَرُونَ مِنْهُمْ سَخِرَ
اللَّهُ مِنْهُمْ وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ} .

(Marka lana amray sadaqada, waan soo xamaalan jirnay, Abuu Caqiiil ayaa nus suus keenay qof kalena wuxuu keenay wax ka badan, munaafiqiinta ayaa yiri: Ilaahay waa ka kaaftoon yahay kan sadaqadiisa, kan uma sameynin arrinkan waxaan ahayn istus waxaa soo degay hadalka Alle: {waa kuwa ku ceebeeya kuwa sadaqaysanaya oo mu'miniinta ah sadaqadooda iyo kuwaan helaynin tabartooda mooyee, way ku jeesjeesaan Eebana wuu kula macaamiloon abaalkooda waxayna mudan cadaab daran}).

Waxaa ka mid ah: inaan lagu jeesjeesin dadka, mu'minka xaqa ah jeesjees ma sameeyo, wuxuu leeyahay Alle:

**{بِاَيْهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا يَسْخِرْ قَوْمٌ مِّنْ قَوْمٍ عَسَىٰ اَنْ يَكُونُوا خَيْرًا مِّنْهُمْ
وَلَا نِسَاءٌ مِّنْ نِسَاءٍ عَسَىٰ اَنْ يَكُنَّ خَيْرًا}**

(Kuwa xaqa rumeyow yuuna yasin ragna rag (kale) waxay u dhawdahay inuu ka khayr badanyahaye, haweenya yayna haween yasin waxay u dhawyihiiin inay ka khayr badanyihiiine), diintena waxay naga reebtay wax kastoo dadka dhibaya, muslinka sifooyinkiisa waxaa ka mid ah inuusan qof dhibin, waxaan khayr ahayn mooyee wax kale inuusan dadka ku samaynin, wuxuu ahaa rasuulka mid reebo wax kaste dadka dhibaya hadal iyo falba xataa tilmaan, wuxuu ku faafin jiray dadka wax kor u qaadaya qiimihooda, waxaa laga wariyay Ummu muusaa waxay tiri: waxaa lagu

xusay ibnu Mascuud Cali agtiisa -Ilaahay raalli haka noqdee - wuxuu sheegay fadligiisa, wuxuu yiri: mar ayuu geed fuulay wuxuu rabay asxaabtiisa inuu usoo guro, asxaabtiisa ayaa ku qoslay dhuubinada lugihiiisa, wuxuu yiri: rasuulka Alle:

(مَا تَضْحِكُونَ؟ فَلَهُمْ أَثْقَلُ فِي الْمِيزَانِ يَوْمَ الْقِيَامَةِ مِنْ أُحْدٍ)

(Maxaa ku qoslaysaan? Wuxuu ka culus yahay miiskaanka maalinta qiyaame buurta Uxud)

**Waxaan oranaya oraatay oo tan ah, Ilaahay
ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, naxariis iyo nabadjelyo korkiisa ha ahaato midka lagu khatimay anbiyada iyo rususha sayidkeena Muxamed ah isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo taabiciinta.

Walaalaha islaamka ahow:

Waxaa ka mid ah qiyamka ugu weyn oo ay suuratu Alxujuraad ugu yeertay: mabda'a walaaltinnimada kor in

loo qaado iyo hagaajinta dadka dheddooda, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

{إِنَّمَا الْمُؤْمِنُونَ إِخْوَةٌ فَاصْلُحُوا بَيْنَ أَخْوَيْكُمْ وَاتَّقُوا اللَّهَ لَعَلَّكُمْ
ثُرْحَمُونَ}

(Mu'miniintu waa uun walaalo, ee wanaajiya walaalihiin dheddooda, Eebana ka dhawrsada, waxaad u dhawdhihiin inuu idiin naxariistee), hagaajinta waxay ka mid tahay qiyamka ugu weyn ay suuraddu sharafta leh ugu yeertay, oo diintena xaniifkana ugu yeerayso oo salka u dhigeyso bulsho dadnimo leh oo is haysata oo isu dabacsan, oo ka shaqaynaysa qiimaha ay leedahay nolosha oo la wadaago iyadoo lays jecel yahay oona laga fog yahay dood, waxayna daawo u tahay wax kaste dood keeni kara.

Xaga qoyska wuxuu noogu yeerayaan quraanka kariimka hadduu khilaaf ka dhex dhaco labada isqaba oo ay xallin waayaan in loo yeero dad wanaag ka muuqda si ay u heshiisiyaan, wuxuu leeyahay Alle:

{وَإِنْ خُفْتُمْ شِقَاقَ بَيْنَهُمَا فَابْعُثُوا حَكَمًا مِنْ أَهْلِهِ مَنْ أَهْلِهَا إِنْ يُرِيدَا
إِصْلَاحًا يُوَفِّقِ اللَّهُ بَيْنَهُمَا إِنَّ اللَّهَ كَانَ عَلَيْهِمَا خَيْرًا}

(Haddaad ka cabsataan iskhilaafka dheddooda u bixiya garsoore ehelkiisa ah iyo garsoore ehelkeeda ah, hadday doonaan wanaajinna Eebe wuu iswaafajin dheddooda, Eebana waa oge xeeldheer), hagaajintan waxay soo gaaraysaa bulshada si ay u noqoto mid heshiis ah, wuxuu leeyahay Alle:

{لَا خَيْرٌ فِي كَثِيرٍ مِّنْ نَجْوَاهُمْ إِلَّا مَنْ أَمَرَ بِصَدَقَةٍ أَوْ مَعْرُوفٍ أَوْ إِصْلَاحٍ بَيْنَ النَّاسِ وَمَنْ يَفْعَلُ ذَلِكَ ابْتِغَاءَ مَرْضَاةِ اللَّهِ فَسَوْفَ نُؤْتِيهِ أَجْرًا عَظِيمًا}

(Khayr ma leh wax badan oo faqooda ah, oon ahayn mid fara sadaqo ama wanaag ama hagaajin dadka dhexdooda, ruuxii fala saas asoo doonayo raalli ahaanshaha Alle waxaanu siin ajir weyn), wuxuu ku caddeeyay nabiga oraahdiisa abaalka hagaajinta iyo saameyska uu leeyahay khilaafka:

(أَلَا أَخْبُرُكُمْ بِأَفْضَلِ دَرَجَاتِ الصَّلَاةِ وَالصَّدَقَةِ؟)، قَالُوا: بَلَى يَا رَسُولَ اللَّهِ، قَالَ: (إِصْلَاحُ ذَاتِ الْبَيْنِ، وَفَسَادُ ذَاتِ الْبَيْنِ هِيَ الْحَالِقَةُ، فَلَا أَقُولُ تَحْلِقُ الشَّعْرَ وَلَكِنْ تَحْلِقُ الدِّينَ).

(ma idin sheegaa wax ka darajo badan salaadda iyo sadaqada?), waxay dhaheen haa rasuulkii allow, wuxuu yiri: (waa kala maslaxaynta, iskuxumaanshaha waa midda wax xiirta, ma oranayo timaha ayay xiirtaa, laakin diinta ayay xiirtaa).

Mu'minka dhabta ah wuxuu ka dhiganayaa kala maslaxaynta manhaj nololeed, markaan arkayno khayr ayaannu arkaynaa, wuxuu leeyahay nabigeena:

(إِنَّ مِنَ النَّاسِ مَفَاتِيحَ لِلْخَيْرِ مَعَالِيقَ لِلشَّرِّ، وَإِنَّ مِنَ النَّاسِ
مَفَاتِيحَ لِلشَّرِّ مَعَالِيقَ لِلْخَيْرِ، فَطُوبَى لِمَنْ جَعَلَ اللَّهُ مَفَاتِيحَ الْخَيْرِ عَلَى
يَدِيهِ، وَوَيْلٌ لِمَنْ جَعَلَ اللَّهُ مَفَاتِيحَ الشَّرِّ عَلَى يَدِيهِ)

(Dadka waxaa ka mid ah kuwa khayrka fure u ah shartana quful u ah, dadka waxaa ka mid ah kuwa sharta fure u ah khayrkana quful u ah, liibaanta waxay u suganaatay qofka Alle furaha khayrka gacmaha u galiyay, waxaa halaag u sugnaaday qofka Alle furaha sharta gacmaha u galiyay)

Ilaahayow nagu hanuuni akhlaaqda midda ugu fiican kuma hanuuniyo qofaan adiga ahayn, nagana leexi teeda xun kama leexiyo qofaan adiga ahayn, ka ilaali noo ilaali mastarteena iyo dhamaan dalalka caalamka

"